

BUUGGA BARASHADA DAAWADA

Doctor:

Cabdishaahid Cabduqaadir Maxamad

Daabacaaddii 1-aad, 2018

Muqdisho –soomaaliya

Waxaa lagu daabacay

Madbacadda Yalax

0616 33 10 11

Si aad u hesho macluumaad ku saabsan cilmiga booqo
beejka face book ee DR Shaahid

Mahad naq.....	9
Cutubka 1-aad.....	10
Pharmacology.....	10
Drug:.....	10
Pharmacokinetics.....	10
Pharmacodynamics:.....	11
Pharmacotherapeutics.....	12
Clinical pharmacology.....	13
Pharmacy.....	14
Chemotherapy.....	14
Pharmacists.....	14
Toxicology.....	15
Cutubka 2-aad.....	15
Ilaha dawada laga soosaaro(Source of Drugs.....)	15
Meelaha dawada laga isticmaalo (Drug administration...)	19
Magic bixinta daawada (nomenclature.....)	21
The Dose OF Drugs.....	21
Types of drug action.....	22
Six Right of Drug.....	24

Lea flet.....	24
Cutubka 3-aad.....	27
Xanuun baabiyaal (pain killers).....	27
Morphine.....	27
Codeine.....	29
Tramadol.....	29
Aspirin.....	29
Ibuprofen:.....	31
Diclofenac:.....	33
Paracetamol.....	35
Cutbka 4-aad.....	37
Drug class Helmentic	37
Albendizole tablet	37
Membendizole.....	39
Piperazine.....	41
Praziquantel.....	42
Metronidzole.....	44
Cutubka 5-aad.....	46
Anti malaria drug.....	46

Artemether.....	46
Chloroquine.....	47
HydroxyChloroquine sulfate.....	50
Mefloquine.....	53
Cutubka. 6-aad.....	55
Antibiotic.....	55
Amoxicillin.....	57
Clavulanate.....	59
Azitromycine.....	61
Cefixime.....	63
Cephalexine.....	65
Ceproflexine	67
Doxycycline.....	68
Erythromycin.....	70
Penicillin G.....	71
Tetracycline hydrochloride.....	73
Cutubka 7-aad = Anti Tuberculoses.....	75
Isoniazid	75
Pyrazinamide.....	77

Rifampicin79

Rifapentine80

Cutbkii 8-aad = Drug class: anti histamine.82

Chloropheramine maelate.....82

Prednisolone.....85

Loratadin.....87

Avil tablets.....88

Cutubkii 9-aad =Anti hypertensive.....

Atenolol.....89

Hydrochlorothiazide.....92

Felodipine.....94

Valsartan.....96

Cutubka 10-aad =Anti Diabetes mellitus99

Acarbose99

Insulin.....101

Metformintab.....103

Cutubkii 11-aad = High cholesterol105

Atorvastatin105

Cholestyramine.....	107
Vitamin B3 Niacin.....	109
CUTUBKA 12-AAD = Drug class: topical anti fungul .	111
Clotrimazole.....	111
Bethametazone.....	112
Fluconazole.....	114
Griseofulvin	116
Ketoconazole.....	119
Nystatin.....	121
Cutubka 13-aad = Anti rheumatoid arthritis.....	123
Auranofin capsul.....	123
Leflunomide.....	125
Cutubka 14-aad = Drug class: topical anti viral.....	127
Aciclovir.....	127
Penciclovir.....	129
Dawada giardiasis.....	131
<i>Anti amobic drugs.....</i>	<i>131</i>
<i>Anti helmintic drugs.....</i>	<i>131</i>
<i>Drugs used intera veginally.....</i>	<i>131</i>

<i>Drugs for acne dawooyinka finaanka</i>	131
<i>Anti fungal drugs dawooyinka fangayga</i>	132
Daawoyinka xanuun baabiyaasha.....	132
Daawooyinka kaadida badiya.....	133
daaweda malaria (anti malaria drugs.....	133
Daawooyinka fidiya xidida dhiiga.....	134
Daawooyinka gaaska	134
Daawooyinka dhagaha.....	134
Matag joojin (anti emetic drugs).....	135
Daawooyinka indhaha.....	135
Daawooyinka xasaasiyda.....	135
Daawooyinka dhiig karka.....	136
Dawooyinka suuxinta.....	136
Daawooyinka qufaca.....	136
Daawooyinka tiibayda.....	137
Dawooyinka bagtariyada.....	137
Daawooyinka caabuqa.....	137
Daawooyinka shubanka.....	138
Daawooyinka dhiig yarida.....	18

Daawooyinka wareerka.....	138
Daawooyinka caloosha bixiya.....	139
Daawooyinka tiibiida maqaarka.....	139
Daawooyinka neerfa.....	139
daawooyinka birta.....	140
Daawooyinka kiliyaha.....	140
Daawooyinka wadnaha.....	140
Dawooyinka eeeynan hooyada uurka leh istimaali karin (non safe medicatin pregnancy).....	140
Dawada hooyada uurkaleh eey isticmali karto (Safe medication pregnancy.....	141
Cabirada dawada measurements.....	142
Xarfa lasoo gaabiyay = Abbreviations.....	143
Tixraac.....	144

MAHAD NAQ

Marka hore waxaa umaha calinayaa ALLAH (SW) kaasoo ii suura geliyay in aan qoro buuggaan ka hadlaayo barashada cilmiga daawada. Allah ayaana ku mahad san.

Intaas kadib, waxaan sidoo kale u mahadcelinayaa dhammaan dadkii igala qeyb qaatay soo saarista buuggaan, kuwaas oo kala ah:

DR . Cilmi xuseen Tarabbi

Cabdi shakuur cabduqaadir maxamad (Dr dayax)

DR . Cabdullaahi Cabdi Caalin

DR. Xuseen Cabdi Diiriye

Eng. Cabdixakiim Cabdullahi

Mastar. Axmad maxamad cismaan

CUTUBKA 1-AAD

Pharmacology

Waa cilmi lagu barto waxtarka waxyeelada isticmaalka iyo qiyaasta daawada.

Erayga pharmacolgy, waxa uu ka kooban yahay labo eray oo kala ah:

1. Pharmaco: uu micnihiisu yahay daawo

2. logy: uu micnihiisu yahay barasho

Asal ahaan erayga pharmacology waa eray afka giriiga ahwaxaana loo aqoonjiray **pharmacon** oo micnihiisu

yahay daawo

Drug: erayga drug waa eray kayimid **french** micnihiisu yahay daawo , loona aqoon jiray geedihii qalalnay (**dry herb**)

Rudolf Buchheim: waa shaqsigii ugu horeeyaya ee sameeyay goobaha lagu barto cilmiga daawada (pharmacology)

Waxaana lafuray goobtaas taariiqdu markay ahayd 1847 wuxuuna udhashay dalka jarmalka

Parmacology has two major brach

Pharmacology waa 2 laamood oo waweyn oo kala ah

- Pharmacokinetics
- Pharmacodynamics

1. Pharmacokinetics : Waxa uu ka hadlaa waxa ay dawadu jirka kaqabato (**what the body does to drug**) ugu hooreentii marka uu qofka qaato dawada. jirka daawada waxa uu ku sameeyaa 4 marxaladood oo kala ah

1. Absorbation
2. Distribution
3. Metabolism
4. Excretion/ elimination

Absorbation: waa habka nuugista daawda kunagasho dhiiga dawooyinka afka laga qaato ayaaa lagu sameeyaa

Distribution: waa habka ee daawada ugu baaheysa jirka waxaana xanbaara dhiiga si uu ugu baahiyo jirka

Metabolism. Waxa uu badanaa kadhacaa beerka waxaa kale uu kadhici karaa meelo kale sida

- Palasma
- Kidney
- Lung

Metabolism. Waa hab kiimikeed oo dawada looga dhigaayo mid waxtar leh (active) oo wax qaban karta

Excretion: waa qashin saar waxa uuna badanaa kadhacaa kiliyaha meelo kalana wuu kadhiikaraa sida sanbabada.

2.Pharmacodynamics: wax uu ka kooban yahay labo eray oo kala ah

- Pharmaco=drug
- Dynamics=ation/power

Pharmacodynamics. Minihiisu waa waxa eey dawadu ku sameeyso jirka noolaha waxyeelo ama waxtar

Pharmacodynamics.waxaa kale uu kahadlaa falkalka kiimikeed ee jirka kadhaca marka daawada laqaato iyo meelaha ay dawadu tageeyso iyo qaabka ay wax oga qabaneeyso.

Waxaa jira waxyaabo saameen kuyeelankara awooda iyo waxtarka daawada. Waxaana kamid ah

- Da.da qofka (age)
- Daawada oo dawo kale lalaqaato
- Kuurada dawada laqaatay (dose)
- Jinsiga qofka (male/female)
- Nafaqo dari (malnutrition)
- Daaewada oo ad keeysi yeelat (resistant)
- Jiin qaldamay (genetic mutation)

Pharmacotherapeutics: waa cilmigii pharmacology gii oo lugu daray kan daweynta

Qofka farmshiiistaha ah waa in uu yaqaanaa xanuunka taasoo usahleysaa in uu ogaado xeriirka kadhaxeeya daawada iyo xanuunka

Pharmacotherapeutics: waa laf dhabarta daawada

Pharmacotherapeutics

Wuxuu intabadan awooda sara

- Selection: daawada ku haboon
- Dosage: xadiga ku haboon
- Duration: mudada ugu haboon

Farmashiistuhu waa in uu yaqaanaa cuduradka ugu yaraan 80%

Boqolkiiba waxayna kasaacideysaa induu wax ka qabto xaalada taagan

Clinical pharmacology

Waa barashada cilmiga daawada bin aadamka waxaana loomisticmaalaa bukaanka **patient**.

marka ladoonayo inlabarto, cilinical pharmacology waa in si wanaagsan loobartaa,

- pharmacokinetics oo ah sida ey daawada jirka ugasho ogana baxdo
- Pharmacodynamics oo ah sida ay daawada jirka wax oga qabato

Sidookale waa laga mamaarmo marka lasoosaarayo daawada ama latijaabinayo (Cilinal pharmacology)

Qeebaha ugu waaweyn ee lagu barto-clinical pharmacology waxaa kamid ah

1. Saameynta daawda
2. Waxyeelada daawda kadhalan karto
3. Isku haleeynta iyo badqabka daawada

Ujeedooyinka ugu waaweyn clinical pharmacology

- ❑ In la aburo daatooyinka lagu istimaalayo daawada
- ❑ Dhiiragalinta kor uqaadista iyo istimaalka dawda

Pharmacy

Pharmacy waa koob cilmiyeesan oo loo farsameeyay diyaarinta, gudbinta, iyo dib u eeygista daawada iyo bixinta adaagyadada xarumaha caafimaadka dadweeynaha

Chemotherapy: waa dawo cayiman ooloo doortay in ay sumayso waxayaabaha ilmo aragtada ah (**organism**)

Chemotherapy waxaa loo kala qeebiyaa labo nooc oo kala ah

1, Antibiotic-waa nooc kamid ah chemotherapy oo gaar u ah batariyada

2, Anti-parasite oo kala h

- ▶ Anti-protozoal
- ▶ Anti-helmenths

Pharmacists

waa qof utababarta farmasiga wuxuuna diirada saaraa badbaadada iyo waxtarka daawada

Toxicology:waa barashada waxyeelada sunta ah ee kujirta daawada

Pharmacologist

Wuxuu qiimeen kusameyaa waxyaabaha kala ah

- Waxtarka iyo wax yeelada dawada
- kor meero sida saxda ah ee daawada loo isticmaalayo
- Daawadaan sida ay ushaqeyso iyo waxyaaba ay daweyneyso

Ilaaha dawada laga soosaaro(Source of Drugs)

Ilaaha daawada laga helo waa afar (4)

1: **Plant sources:** Daawda geedaha lagasoosaaro

2: **Animal sources** Daawada xoolha laga soo saaro

3. **Mineral sources:** Daawooyinka macdanta laga soo saar

3. **Synthetic sources:** Daawooyinka kiimikada ah

Plant sources

1. Dhirta waa waxyaabihii ugu horeeyay ee lag sameeyay daawada

Waana midka ugu badan oo ilaa iyo hada daawo laga sameeyo

Daawooyinka waxaa laga soo sameeyaa qeebaha kala duwan ee geedka sida

- ❖ Leaves : Caleemaha

- ❖ Flowers: Ubaxyada
- ❖ Fruits: Miraha
- ❖ Seeds : Iniinta
- ❖ Roots: Xididka
- ❖ Bark: jilifta
- ❖ Stem: jirida

Plant sources

1.Leaves:Caleenta inta badan waxaa laga soo saaraa daawooyinka loo isticmaalo qufaca iyo xabka feeraha (Component of cough syrup) sidoo kale waxaa laga sameeyaa dawooyinka oo badan

2. flowers: ubaxa intabadan waxaa laga sameeyaa dawooyinka looga hortago xanuunada (**Medication opiate**) sida daawada (**Morphine**) iyo kuwo kale oo xanuun baabiyaal ah

3.Fruits: miraha waxaa inta badan laga helaa dawooyinka loo isticmaalo caloosha iyo fangay-ga

4. seeds: iniinta inta badan waxaa laga soosaaraa dawooyinka loo isticmaalo neerfayaasha

5. Roots: xididka intabadan waxaa laga sameeyaa dawooyinka loo isticmaalo matag jojinta iyo wixii lamid h

6.Stem: jirida intabadan waxaa laga sameeya dawooyinka lagu dajiyo xanuunka murqaha (Muscle) ama dawooyinka suuxinta (Anesthesia)

Animal sources

Daawada lagahelo xayawaanka (animal source) wuxuu kamid yahay ilaha ugu badan ee lga helo daawada

Aqoon yahanada sayniska.waxay xayawaano kaladuwan kasoo saareen dawooyin farabadan kuwaasoo waxtar uleh nolosha aadanaha.daawooyinka laga soo saaro xayawaanada ayaa sabab unoqotay in lagu badbaadiyo malaayin malaayiin naf oo udhiman lahaa cudurro fudud iyo kuwo culus oo daawadooda lagu dhibanaa.

Daawooyinka ugu caansan iyo meelaha laga helay

- ❖ Saca ganaciisa (cow pancreas) waa isha laga helo daawada **insulin** kaasoo lagu daaweeyo cudurka macaanka (Diabetic)
- ❖ Kaadida naagta uurka leh waxaa laga helaa maado looyaqaano **human chorionic gonadotropin (hcg)** oo lagu daweeyo madhaliisnimo (**infertility**)
- ❖ Qanjirka idaha (sheep thyroid) waxaa lagahelaa maadada **thyroxin**. Oo lagu daaweeyo dhiigkarka (hypertension).
- ❖ Beerka saca **cow liver** waa isha laga helo **vitamin A** iyo vitamin D
- ❖ Dhiiga xayawaanka **blood animals**waxaa laga diyaariyaa talaalada (preparation vaccines).
- ❖ Waxaa kale oo jira dawooyin qalajiyaal ah oo laga soosaaro noolaha gaar ahaan **fungi** iyo **bacteria**. Waxaana lagula dagaalamaa ama lagu daaweeyaa cudurada ay sabaabaan fangayga iyo bateeriyada

- ❖ Caloosha xoolaha **Stomach tissue**: waxaa laga helaa wax loo yaqaano(pepsin and trypsin) taasoo loo isticmaalo daawada boog calooleedka (peptic ulcer)

Daawada lagahelo macdanta (mineral source)

Macdanta waxaa laga sameeyaa daawooyin farabadan oo waxtar caafimaad uleh aadanaha.

Sida aan wada ogsoonahay jirka aadaha waxaa kujira macdan kuwaas oo jirka muhiim u ah kana qabata shaqooyin waaweyn sida dabka jirka. Garaaca wadnaha. xoojinta lafaha.

Daawada waxaa laga sameeyaa macdanta labada nuuc ee kala ah mid bir ah (metallic) iyo mid bir ma eha (nonmetallic)

Daawooyinka ugu caansan ee macdanta laga helo amaba laga sameeyo waxaa kamid ah

- Iron. Waxaa lagu daaweeyaa dhiig yarida (anemia)
- Zinc. Waxaa lagu daaweeyaa cuduro badan sida shubanka. Cadhada. Canbaarta. Iyo dhaawaxyada
- Iodine. Waxaa loo isticmaalaa in lagu dilo jeermiska iyo dhaawayada sidookle qofka ay kuyaraato iodine. Waxaa lasiiyaa in qiyaas ah
- Mercurial salt. Waxaa lagu daaweeyaa is fiilitada (syphilis)
- Sodium bicarbonate iyo aluminum hydroxide waxaa lagu daaweeyaa gaaska

Synthetic Sources

Waxaa laga sameeyaa waxyaabo dabiici ah ayadoo loo adeegsanayo sheeybaar

Waayadaan inta ugubadan daawada waa kuwo aadanuhu kusameeyaan hab sheeybaar kudhisin

Synthetic sources.Waa marka daawada gabi ahaan lagu sameeyo isbadal sida bu.da daawada iyo qaab dhismeedka kiimikada ee daawada.

Sami synthetic drug. Waa markii aan daawada isbadal aan lagu sameen oo dhanka **nucleus** ka ah iyo **chemical structure**ka waxaa kaliya lagu sameeyaa naash naash.

Sida lawada qabo daawooyinka sanaacig ah waa kuwo waxyeelo yar markii loo eego nuucyada ilaha kale ee daawada laga helo.daawooyinka sanaaciga waxa ay ka kooban yihiin qeeb waxtar leh iyo kiimikaal oo ku yar. Dawooyinkaana sanaaciga ah waxaa ugu caansan Aapirin.quaniin.chloromphinecol.

Meelaha dawada laga isticmaalo (Drug administration)

Daawada waxaa laga isticmaalaa 8 meelood oo kala duwan sida

1. Afka (Oral)
2. In laisku duro (by injection)
3. In carabka la hoos galiyo (sublingual) ama lataqsiinto (buccally)
4. In dabada lagaliyo (rectally) ama xubinta haweenka (vagina)
5. Isha in lagu shubo (ocular rout) ama dhagta lagushubo (otic rout)
6. Sanka in lagushubo (nasal rout)
7. Korka in lamarsado
8. Howo ahaan inloo qaato (inhalation)

Midkasta oo qaababka daawada looqaato kamid ah waxa uu leeyahay faa ido u gooni ah iyo ujeedo u gooni ah

Meelaha dadka laga duro (injectin sites)

Nuucyada duriin ee ugu caansan ee laa iyo hada la adeegsado waa 5 nuu

1. Duriinka xididka (interavenous injection)
2. Duriinka muruqa (intra muscular injection)
3. Duriinka maqaarka (intra derma)
4. Duriinka baruurta (subcutaneous)
5. Duriinka xangulaha(spinal injection)

Muruqa meelo badan ayaa laga duraa waana duriin ubahaan in si cilmiyeesan qofka loo duro waxaana laga qaataa qeebo badan sida

- Sinta (Ventrogluteal muscale of th hip)
- Garabka (Deltoid muscle of the arm)
- Cajarka (Vastus lateralis site)

Ujeedooyinka loodurayo muruqa waa n daawadu ku gaarto si tartiib ah jirka inta badan muruqa waxaa laga qaataa daawada ugu tanka badan lana doonayo in sitatartiib ah lagu nuugo laguna darao dhiga,

Qiyaasta daawada ee muruqa lagushubikaro waa 2...5 mililiters

Magic bixinta daawada (nomenclature)

Daawo kastaa waxa eey leedahay sadax magic mid kood .

1. Chemical name

2. Trade/brand/commercial name
3. Generic name
- **Chemical name.**waamaga utaagan kiimigada eey daawada kasameeysantahay

Tusaale example

Amoxicillin cap

- **Trade name.** waa magaca eey olo baxdo shirgada daawada soosaartay magaceyda

Tusaale example

Emox syrup

Generic name.waa in dawada loo bixiyaa maga la is layaaqaano dunida oo dhan. Magaca nuucaan ah waxaa laga soo dharaan dhiriya kiimikada daawadu eey kasameeysan tahay mid utaagan.

Tusaale, example

Chemical , Acetyl salicylic acid

Generic, Aspirin

Trade, Disprin

The Dose OF Drugs

1. Minimum Therapeutic Dose
2. Maximum Therapeutic Dose
3. Normal Therapeutic Dose
4. The Toxin and death Dose

1. **Minium therapeutic dose:** waxaa loo Yaqaanaa qiyaata daawo uguyar ee la isticmaalo

2. **Maximum threapeutic dose:** Waa qiyaasta daawo ee ugubadan

3. **Normal therapeutic dose:** waa qiyaata daawada oo dhax dhaxaad ah

4. **The toxin and dheath dose:** Waa qiyaasta daawo ee lagu sumowbo ama lagu dhinto

Types of drug action

1. Therapeutic affect

2. Side effect

3. Toxic effect

4. Allergic reaction

5. Drug Tolerance

6. Drug intera actions

Therapeutic effect

- ▶ Waa saameynta kala duwan ee daawadu kuleedahy jirka. Hal dawo ayaa jirka ku yeelan karto saameyn kaladuwan tusaale aspirin-ka waxaa loo adeegsadaa in lagu daweeyo qandhada, iyo in uu yareeyo xadiga xinjireynta dhiiga

Side affect

- ▶ Daawada waxey yeelan karta dhibaatooyin aan lafileyn iyo mid aan waxyeelo, leheyn tusaale cirbada loo yaqaan(Pincillin) waxa uu sababikaraa Shoog lamafilaan ah waana halis

Toxic affect

Saameeynta sumowga waxaay kor dhaan mudo dheer oo laqaato daawada tusaale heerka sumowwida (Amoxicillin ama Ampicillin) waxaa kamid ah

- ▶ ▪Lallabo
- ▶ ▪ Matag
- ▶ ▪ Calool xanuun

Allergic reaction

- ▶ Waa falcalin aan lasaadaalin karin oo katimaada daawada waxaa laga yaabaa daawooyinka qaar oo aan lagafileyn in ay yeeshaan xasaasiyad, sida dawada ceftrixone

Drug tolerance

Dadka qaar si fudud kuma gaarto daawada, jirkooda Tusaale dadka caba caanaha geela. muqaadaraadka iyo kube uu jirkoodu adkeysiga leeyahay, sidaas daraadeed waxaa loo gordhiyaa xadiga daawada

Drug intera action

Isdhaxgalka daawada. marka hal dawo lagu daro waxqabadka dawo kale ayaa layiradaa isla qaadashada daawada is ku darka labo dawo waxay sameyn karaan fir fircooni tusaale marka la isku daro (Paracetamol iyo Ibuprofen) waxaa kadhasha fir fircooni badan qofka wuxuu dareemaan xanuun la aan jirka ah

Six Right of Drug

- 1.Right drug: Daawo sax ah
2. Right Dose: Qiyas sax ah
3. Right patient: Bukaank sax ah
4. Right route: Meel sax ah
- 5.Right Time: waqti sax ah
6. Right Administration

1.Right Drug: daawo sax ah in lasiiyo bukaanka waxay kacaawisaa in uu dareemo bukaank fir firconi badan maxaa yeelay daawda saxda ayaa ah midka uu qofka kadareemi karo cafimaad sax ah

2. **Right dose:** qiyaas sax ah weaxaa lasiin karaa bukaanka marka lahubiyo miisaankiisa iyo da,diisa

3.**Rightpatient:** bukaank sax ah si aad dawo usiiso hubi bukaanka magaciisa in uu yaha magaca saxda ah

Right route

4 **Right route:** Meel sax ah in lagasiyo daawada bukaanka. Tusaale hadii daawo muruqa ah lagasiyo qofka xididka.

Waxaa ka imaankaro dhibaatooyin kala duwan sida. in uu dhinto ama uuku naafoobo

5.Right time: waqti sax in lasiiyo daawada bukaanka iyo inta jeer ee uqoran

6. Right administration: si sax in loo maamulo daawada . Tusaale in ladhigo daawada meel ku haboon

Lea flet

1.Composition: Kiimikada daawada

2. Indication use:isticmaalka daawada

3. Side effect: Saameynta daawada

4. Adverse and effect: Kahottag iyo saameyn

5.Warning: Digniin

6. Risk and precaution: Qatraraha daawada

7. Dose and admin: Qiyaas iyo maamulid

8. Contra indication: lamasiinkaro

9. Manufacture Date: Xiliga ay soobaxday daawada

10.Expire Date: Xiliga ay dhaceyso

- ✓ **Composition:** Waa kiimikada ay dawada kakooban tahay, Tusaale Amoxicillin waxaa kujira wax loo yaqaano, (magnesium stearate. iyo lactose monohydrate) waxeyna kujiraan Amoxicillin kasta.

- ✓ **Indication (Use)** Isticmaalka iyo waxtarka daawada, daawo kastaaba waxey leedahay isticmaal iyo waxtar ugooni ah Tusaale, meelo badan ayaa dawada laga isticmaalaa sida Afka. Dabada. Xididka. Dhagaha. iyo meelo kaladuwan oo kale .
- ✓ **Adverse and effect:** Waa kahortag iyo saameyn Tusaale daawada waa labo nuuc sida daawo laqaato cuntada kadib iyo daawo laqaato cuntada kahor, hadii uu qofka qaato dawo loogu talagalay cunto kadib dawadaas waxay ku yeelan kartaa saameyn balaaran.
- ✓ **Side affect:** Saameynta daawada ay ku yeelato qofka Tusaale. waxaa dhici karta in daawada qofka ay saameyn ku yeelato sida, in uu kusuuxo ama ku wareero.
- ✓ **Warning:** Digniin in looga digo qofka waxa yaabaha ka imaan kara daawada sida in uu uurka waxyeeleeyo. iyo hadii uu si qaldan u isticmaalo waxyaabaha kadhalan karo.
- ✓ **Risk and preaction:** Qataraha daawada waxey timaadaa marka si qaldan ama meel qaldan laga isticmaalo daawada, Tusaale. daawo lagu talagalay in laga isticmaalo sinta hadii uu qofka ka isticmaalo xididka waxaa ka imaan kara qatarta ugu weyn ee dawda kadhalata .
- ✓ **Dose and admin:** Qiyaas iyo maamulid daawo, daawo kastaaba waxay leedahay qiyaas laga qaadan karo qiyaastaas oo ah mida uu dhaqtarka qoray ama midka (Leflet-ka ku qoran)
- ✓ **Contra indication:** Lamasiin karo ama lama qaadankaro Tusaakle lamaqaadan karo dawooyinka uurka baabiyekuwa xasaasiyada kiciya iyokuwadaraagiska ah.
- ✓ **Manufacture Date:** Xiliga daawada lasoo saaray Tusaale dawo ayaa la soo saray 2019.
- ✓ **Expire Date :** Xiliga ay daawada ey dhaceeyso Tusaale daawadii lasoosaaray 2019 ayaa waxay dhaceeysaa 2022

CUTUBKA-2AAD

Xanuun baabiyaal (pain killers)

Analgesics. Waa dawooyin loo istimaalo in lagu yareeyo xanuunka (pain)

Anti-pyretics= waa dawooyin loo isticmaalo in lagu yareeyo qandhada (fever)

Waxaa jira labo nuuc oo **analgesics**soo kala ah

1. **Opioid analgesics**
2. **Non opioid analgesics**

Opioid analgesics. Waxaa kamid ah

1. Morphine,
2. Codeine
3. Tramadol

Morphine.Waa daawo loo istomalo xanuunada daran dawadaan waxaa laga soo saraa

Dhirta plnts

Xoolaha Animal

Daawadaan waxay kamidtahay dawooyinka aanan dhaqtar la,aan la isticmaali Karin sabab too ah waa daawo maan dooriya noqonkarta hadii sifa qalad ah lagu iibiyo

Dawadaan wa eey kutimadaa

- Kaniini tabets
- Cirbad injection
- Subosto suppositories

Indication.

Daawadaan waxaa loo isticmaalaa in lagu yareeyo xaaladaha xanuun ee daran waxayna si toos ah waxa oga qabataa neerfa yaasha (Nervous system) sidookale waxaa loo qadan karaa

- Xanuunka sooboodka ah (Acute pain)
- Xanuunka raagay (Chronic pain)

Maraarka qarkood waxaa looistimalaa xanuunka foosha ee aadka udaran

Dosage

Istimaalka dawadaan intabadan waxaa la siiyaa dawadaan dadka waaweyn waxaana qiyaas ahaan laga qataa 20mg 4 saacba mar.

Side effect

Dhibaatooyinkiisa waxaakamid ah

- ❖ Lalabo Nausia
- ❖ Matag Vomiting
- ❖ Calool fadhi Constipation
- ❖ Afka ooqalala Dry mouth
- ❖ Cuntada oo istaagta loss of appetite

Contra indication

Lamasiinkaro hooyada uurkaleh bilaha hore ee uurkeeda iyo caruurta yaryer

Codeine.Waa sida morphine-ta oo kale balse waa ay kadaciifsan tahay

Tramadol.waa sida codeine-ta oo kale balse way kadaciifsan tahay waxaana loo istic malaa xanuunada dhaxdhexaadka ah

Non-Opoid analgesics

1, Naloxone.Dawadaan waxaa loo isticmalaa dadka kusumoowa daawada loonyaqaano (morphine ant-dote)

ASPIRIN :

Aspirin sidookale waxaa loo yaqaabnaa (actylsalicylic acid)

Indicaton.

Daawadaan waxaa loo isticmaalo xanuunada kala duwan sida

- ☒ Xanuunka pain
- ☒ Qandhada fever
- ☒ Bararka Inflammatory
- ☒ Caabuqa Inflammation

Xaaladaha kale oo loo isticmaalo aspirin-ka in lagu daweeyo waxaa kamid ah

- ☒ Qandhada lafaha rheumatic fever

☒ wadana xanuun heart attack

☒ Dhiiga xinjirowba blood clots

Daawada aspirin-ta waxaalagu yereeyaa qtaraha kadhaha qeeybaha kaladuwan ee (Cancer-ka)

Dosege:

Qiyaasta dawadaan laga qaadankaro waxay ku xirantahay hadba xalada lagu daweynayo iyo Da,da iyo miisaanka qofka waxaana laga qaataa garaam kaladuwan sida

60mg

75mg

300mg

325mg

Side effec:

Dhbaatooyinka uu leeyaha aspirin-ka waxaa kamid ah

◇ Kaas calooleed Gastro intestinal ulceration

◇ Calool xanuun abdominal pain

◇ Dhiig calooleed Stomack bleeding

◇ Madax xanuun headche

◇ Nabro resh

Contra indication:

Dawadaan marka aad uqaadaneysa wadne Xanuun kafagow isticmaalka dawada (Ibuprofen)

Hadii laga maarmi waayo xiliga uu uurka jiro si looga hortago xinjireenta dhiiga waxaa layareenayaa xadiga qiyaata daawada tusaale ahaan waxaa lasinayaa 60mg

Qofkasta uu cashirkaan soo gaaro hasheer gareeyo

Ibuprofen:

Dawadaan waxeey kamid taha dawooyinka ugu caan san ee loo isticmaalo xanuun baabiyaasha

Indication:

Dawadaan waxaa loo isticmalaa in lagu baabiyo xanuunka sida

- ☒ Xanuunka pain
- ☒ qandhada fever
- ☒ Caabuqa inflammation

Iyo in lagu daweeyo xanuunka adka ah ee caadada pain ful menstrual periods

- ☒ Lafa xanuunka rheumatoid arthritis

Dosege:

Qiyaastadawadaan waxay kuxirantahay da,da iyo miisaanka waxaanalaga isticmaalkaraa

- ☒ 100m
- ☒ 200mg
- ☒ 400mg
- ☒ 600mg
- ☒ 800mg

Dawadaan waxay kutimadaa nuucyada kala ah

- ☒ kaniini Tap
- ☒ Shorobo Syrup
- ☒ Cirbad Injection

Comman side effect:

- ☒ Wadnaha oo kululaada heart purn
- ☒ Nabro rash

Side effect:

- ☒ Gaas calooleed gastro intestinal
- ☒ Sidoo kale waxaa dhici karta
- ☒ Kiliyaha oo istaaga kidney failure
- ☒ Wadnaha oo istaaga heart failure
- ☒ Beerka oo istaaga liver failure

Contra indication

Dawadaan lamasiinkaro hooyada uurka leh iyadoo lagabaqayo in uu saameyn balaaran uu kuyeesho hooyada iyo canugeeda

Qofkasta uu soo gaaro cashirkaa fadlan

Diclofenac:

Waa dawo xanuunbaabiye ah ee aan wax maadooriya ah la heynta (Non-steroidal anti-inflammatory drug)

Dawadaan waxaa lasoo saaray 1965

Dawadaan waxay kutimadaa.

- Kaniini Tablets 50mg 100m
- Cirbado Injection 75mg Iv im
- Subosto Suppositories 25mg 100mg
- bomaato Diclo gel 30mg

Indication:

Diclofenac

waadaawo loo isticmaalo in lagu daweeyo xanuunka (pain and inflammatory diseases) Side

- Kala goosyo xanuun: joints pain
- Lafo xanuun rheumatoid arthritis

- ILko xanuun Dantal pain
- Jugta traumatic pain

Iyo xaladaha xanuun ee kadhaha kiliya dhagaxaanta kujira(kidney ston)

Comon side effect:

Dhibaatooyinka ugu caansan ay ugeeysato dadka daawada diclofen waxaa kamid ah

- ☒ Calool xanuun: abdominal pain
- ☒ Gaaska mindhicirada gastro intestinal
- ☒ Lalabo nousea
- ☒ Madax xanuun headche
- ☒ Barar swellin

Serious side effect:

Dhibaatooyinka ugu daran ee geesato daawada diclofen waxaa kamid ah

- Wadne xanuun: heart diease
- Afqalooc strock
- Cilad kiliyaha ah kidney problems
- gaas calooleed stomach ulceration

Contre indication:

Dawadaan lamasiin karo dadka qaba Xasaasiyada.

✕ Sanboirka

✕ Shooga

iyo hooyada uurka leh sadaxda bilood ee ugu horeeysa uurkeeda lakiin waa lasiin karaa hooyada nuujineyso (breast feeding)

paracetamol

paracetamol sidookale waxaa loo yaqaanaa (acetaminophen)

daawadaan waxeey kutimaadaa

kaniiniyaal tablets

sharoobo syrup

cirbad injection

sabosto suppositories

indication

daawadaan waxaa loo isticmaalaa in lagu yareeyo xanuunka . sida

xanuun pain

qandhada fever

sidookale waxaa lagu daweeyn karaa xanuuno kale sida

xanuunka kansarka cancer pain

xanuunka qaliinka kadib pain after surgery

dosage.

Qiyaasta dawadaan laga qaadankaro waa

Children

1-11 bilood Sharobo 25mg 1xabo 1x2

1-6 sano sharobo 100mg 1x2 1xabo

1-9 sano sharobo 125mg 1x2

Adult

Kaniini 10xabo 1x2

Side effe

Dhibaatooyinka eey keeni karto dawadaan waxaa kamid ah

- Lalabo nausia
- Matag vomitin
- Cuntada oo istaagta loss of appetite
- Calool xanuun stomach pain
- Kaadida oo isbadasha change in the urine

Precaution

Waa in laqaataa talada iyo waanada dhaqtarka

CUTUBKA 3-AAD

Drug class Helmentic

Albendazole tablet

Albendazol. Waxaa loo yaqanaa **albendazolium**

Dawadaan waxay kutimadaa kaaniini iyo sharoobo

Indication or principle uses.

Waxaa lagu daweeeyaa gooryanada kala duwan sida

- Giardiasis
- Trichuriasis
- Ascariasis
- Filariasis
- Pinworm disease
- Taenia sainata
- Taenia solium
- Parasite infection
- Tapworm

How to drug work

Sidee dawadaan ushaqeysaa

Dawadaan waxay faragalin kala duwan kusameysaa iyoo hab awood leh kusoo saaresa dayactireysana sokorta kana sameyneyso awood

Dosage

Daawada qiyaas ahaan la siin karo

Caruurta ka weyn 6. lixbilood iyo dadka waa weyn waxaa la siinayaa 1 xabo kaniin ah 400mg halmar

Caruurta lixbilood ka weyn uu miisaankoodu ka yaryahay 10kg waxaa la siinayaa 200mg halmar

Side effect:

dhibaataada ay keeni karto waxaa kamid ah

- Madax xanuun headche
- Calool xanuun , abdominal pain
- Laabo nausea
- Matag vomiting

Precaution :taxadarka

Waa in la qaataa talooyinka dhaqtarku ku siinaayo

Drug intrection

daawada aan lala qaadan karin

In ta bada waxaan lala qaadan karin daawada loo yaqaano

- Amethazone
- Praziquantel
- Theophyline

Disease intrection= ma jiraa cudur lid ku ah

- Cirrhosis,
- cudurada beerka ku dhaca ayna keento isticmaalka aashitada sida cabitaanada

Contraindication lama siinkaro

Lama siin karo hooyada uurka leh sadexda bilood ee ugu horaysa ,uurkeeda

Laakiin hadii hooyadu nuujinayso cunug weyqaadan kartaa

Hasiin cunuga ka yar 6 bilood

Membendizole

Composition=daawadu waxa ay ka samaysan tahay

Benzoyl benzimidazole and carbamate

Treearapeutic drug

daawooyinka uu ka mid yahay

Anti helmentic

Available

maxaa la heli karaa daawadan

Waxaa laga heli karaa kaniini iyo sharoobo

Indication or principle uses.

Isticmaalka daawada

dawadaan waxaa loo isticmalaa qaar kamid ah goor yaanada

worm infaction. Sida

- ascariasis
- pinworm diseases

- hook worm infaction
- hydatid disease
- and giardia

Side effect =dhibaataada ay keento

- Matag vomitin
- Madax xanuun headache

How to drug work

Side daawadaani u shaqaysaa

Mebendizole waxay dhex gashaa inay soo saarto hab ay ku jirto ka hortag gooryaanka ee laga soo nuugay sonkorta

Dosage

Daawada qiyaasta laga qaato

daawadan waxaa la siinkaraa caruurta ka weyn 2 sanno iyo dadka waaweyn 100mg mudo sadex maalmood ah daawadaan ku celi bukaanka 2 ilaa 3 usbuuc

Drug interactions

Ma jiraan dawooyin ay isdiidayaayan

waxaan lala qaadan Karin daawwadan bamazepine

disease intraction

Ma jiraan cuduro saamaynku leh daawadan

hadii aad qabto cudurada ay ka midyihiin cudurka beerka ama crohn,s disease ama ulcerative colitis

contre indication

lamasiin karo caruurta kayar labada sano

lama haayo wax data ah oo ku saabsan in uu wax dhibaato ah u geeysan karo hooyada uurka leh

Piperazine

Brand name: piperazine

Daawadan waxay ku timaadaa

kaniini Tablets

Indication or principal uses Tilmaanta

Waxaa loo isticmaalaa gooryaano badan oo kala duwan sida

- 1 ascariasis
- 2 Enterobius vermicularis
- 3 worm infaction
- 4 Roun worm

How to drug work

Daawadan waxay suuxisaa gooryaanka kadibna waxay ka soo saartaa saxarada

Dosage =Daawada qiyaas ahaan la siin karo waa sidan

Waxaa lagu daaweeyaa gooryaano kala duwan waxaana la siinayaa 3.5g labo maalin

Ku celi hal isbuuc ,caruurta sii 75mg ku celi 2 isbuuc ka dib

Onset of effect ..xiliga uu bilaawdo dhibaatiisa

Lama yaqaano

Duration of action ..xiliga uu soconkaro

Lama yaqaano

Precaution :taxadarka

Daawadan u isticmaal caruurta yar yar malahan dhibaato

Dawadaan hooyada uurka leh way isticmaali karta

Drug interaction=daawada aan lala qaadan karin

Daawadan hala isticmaalin phenothiazines

Disease interaction =cuduro lid ku ma jiraan
qalal wuxuu kuu keenikaraa dibaato

Praziquantel

Brand name: biltricide

Antihelmentic tablet 600mg

Daawadan waxay ku timaadaa kaniini

Indication or principal uses = waxa loo isticmaalo

Waxaa loo isticmaalaa gooryaano badan oo kala duwan sida

Worm infection

- 1 Schistosomiasis

- 2 Clonorchiasis
- 3 Tap worm infection
- 4 Hydatid disease

Dhamaan gooryaanadan waa in lagu daaweeyaa praziuantel waana goor yanada ugu xooga badan






How to drug work:

Daawadan waxay kala dhig dhigtaa murqaha gooryaanadan iyo difaacooda kadibna waxay ku guulaysataa inay dibada u soo saarto

Dosage =daawada qiyaas ahaan la siin karo waa sidan

Daawadan waxaa la siiyaa dadka waaweyn iyo caruurta yar yar waxaana loo qaataa 2.2ibs 1kg 1x3

Side affect..dhibatada uu leeyahay

-  Calool xanuun abdominal pain
-  Matag vomiting
-  Madax xanuun headache
-  Xasaasiyad allergic
-  Haddii uu uur jiro lama isticmaali karo

Onset of effect= xiliga uu bilaawdo dhibaatadiisa

Lama yaqaano

Duration of action =xiliga uu soconkaro

Lama yaqaano

Precaution :taxadarka

Daawadan u isticmaal sida dhaqtarku kuu amray

Drug intrection=daawada aan lala qaadan karin




Daawadan hala isticmaalin corticosteroids,keteconazole

Disease intrection=cuduro lid ku ma jiraan hadii aad qabto cudurada beerk

Metronidzole

Brand name .flagyl

Waxay kutimadaa

-  Kaniinyaal tablets
-  Sharoopo syrup
-  Faleembo infucion

Indication or principle uses. Waxa loo isticmaalo

Dawadaan waxaa loo isticmaalaan gooryamada kala duwan sida

- Amebisis
- Giardiasis
- Trichomonisis

Sidookala metronidzole waxaa loo isticmali kara xanuunada ku dhaca kadi mareenka iyo xanuunada ey keenaan **bacterialvaginosis**

How to drug work. Side dawadaan ushaqeysaa

Dawadaan waxay burburisaa difaaca gooryanada waxayna ku kuuleysataa inay suuxiso ama aydisho gooryanada

Dosege. Qiyaasta dawadaan laga qaadan karo

- ❖ dadka waawey waxaa lasiyaa 500mg kanini 16 xabo 1x2
- ❖ faleembo infusion 12 xabo 1x2
- ❖ caruurta yayar shoropo 200mg 1x2 dawo siinta caruuta waxay ku xiran tahat da,da iyo miisaanka

Side effect, dhibaatooyinka uu yeelan karo

- matag nausea
- cuntada oo ka xirmata loss of appetite
- madax xanuun . headaches

over dose. dawadaan oo qiyaastayda la iska badiyo

- lalabo nausea
- matag vomiting

Disease intrection .cudur lid ku ah

Waxaa lid ku ah cudurada kala ah

- 🚫 neerfaha
- 🚫 kilya xanuunka
- 🚫 beer xanuun

contre indication

lamasiin karo ilmaha kayar 2 sano

waxdaata ah lamahayo in hooyada uurka leh uu dhibaato uleeyahay

CUTUBKA 5-AAD

Anti malaria drug

Artemether

Dawadaan waxeey kutimaadaa

Kaniini tablets

Sharoobo syrup

Cirbad injection

Indication isticmaalka

Artemether.waxaa loo isticmaalaa in lagu daweeyo malariyada. Gaar ahaan waxaa loo isticmaalaa malariya da aadka udaran waxeeyna lamid tahay dawadaan quinine.

Dosage .qiyaasta daawada

Qiyaasta laga isticmaalayo daawada waxeey ku xiran tahay Da.da.miisaanka. Iyo heerka malariyada

Children.

Caruurta waxaa lasiinayaa sharoobo

1-6 bilood marka ugu horeeysa 10ml kadib 5ml

7 bilood ilaa 3sano 20ml kadib 10ml

4-8 san 30ml kadib 15ml

9-12 sano 40ml kadib 20ml

Adult

Waxaa lasiinayaa cirbad (injection)

80mg 2xabo kadib 1xabo

Side effect

Artemether. Waxa uu sababi karaa waxyar oo wadno garaac ah

Precaution taxadar

Waa in laqaataa talooyinka dhaqtarka si looga badbaado waxyeelada daawada.

Chloroquine

Brand name: Aralen ,aralen HCl

Aralen phosphate tablet500mg/syrup/injection

Daawadan waxay ku timaadaa kaniini iyo sharoobo

Indication or principal usesIstimaalka

Waxaa lagu dawaayaa loogana hortagaa malariyada oo ay keento plasmodium sidoo kale waxaa lagu dawayaa **amebiasis parasite** aadka u adag iyo lafa xanuunka

Common side effect.

Dhibaatooyinka ugu caansan

- ✚ Dhibaato murqaha ah.. muscle problems
- ✚ Cuntada oo xiranta... loss of appetite
- ✚ Shuban diarrhea
- ✚ Nabro maqaarka ah skin rash

Serious side effect

dhibatooyinka ugu qatarsan

- Aragti la, aan whth out vision
- Qatar kutimaada murqaha muscle damage
- Unugyada dhiiga oo hoos udhaca.. low blood cells

How to drug work..

Sidee dawadaan ushaqeysaa

Daawadan chloroquine waa sun loo isticmaalo cudurka malariada

Dosage

Daawada qiyaas ahaan la siin karo waa sidan

Caruurta yar yar waxaa ku haboon in la siiyo sharoobooyinka hadii ay waxkatariwaayaan ayaa loo isticmaali karaa cirbad iyadoo loo fiirinaayo qiyaasta ku haboon chloroquine

Laakiin dadka waaweyn waxaa la siinayaa kaniini ama cirbad chloroquine tablet 500mg maalintii halmar

Age	0	2 Months	1 year	5 Year	15 year	Adult
Weight		4 Kg	8 kg	15 Kg	35 Kg	

100mg base table day 1 day 2		$\frac{1}{2}$	1 tablet	2.1/2	6	
Day 3		$\frac{1}{4}$	$\frac{1}{2}$	1	3	
150 mg table base Day 1 and day 2		$\frac{1}{8}$	$\frac{1}{2}$	1.1/2	4	
Day 3		$\frac{1}{8}$	$\frac{1}{4}$	$\frac{3}{4}$	2	

Precaution

Taxadarka

Waa in la qaataa talooyinka dhaqtarku ku siinaayo

Over dose

Daawada oo qiyaasteeda layska badiyo

- ❖ Madax xanuun
- ❖ Dawaqaad iyo wareer
- ❖ Aragtida oo isbedesha
- ❖ Isbedelku yimaada garaacista wadnaha
- ❖ Cadaadiska dhiiga oo hoos u dhaca

Drug intrection

Daawada aan lala qaadan karin

Magnesium salts and anti acid cemitadin

Disease intrection

Ma jiraa cudur lid ku ah

Cudurada beerka

cudurada neerfayaasha

Contraindiction

Lama siinkaro

Lama siin karo hooyada uurka leh sadexda bilood ee ugu horaysa ,uurkeeda

Laakiin hadii hooyadu nuujinayso cunug weyqaadan kartaa

HydroxyChloroquine sulfate

Brand name:magaca kiimikada waa

PlaquenilApothecon tablet200mg

Daawadan waxay ku timaadaa kaniini iyo sharoobo waxayna ka kooban tahay

Daawada malariada iyo daawada caabuqa ,iyo daawada lafoxanuunka

Indication or principal uses... isticmaalka

Waxaa lagu daweyaa loogana hortagaa malariyada oo ay keento **plasmidium** waxaan sidookale lagu daween karaa romatiisimada aadka udaran

Stomach upset

Side effect =dhibaataada ay keeni karto

- lalabo nausea
- calool xanuun stomach crmps
- cuntada oo xiranta loss of appetite
- shuban diarrhea
- daciif nimo dizziness
- madax xanuun headche

How to drug work ... side dawadaan ushaqeysa

